My Options



# Macluumaadka ilmo-iska-ridista iyo taageero dhegaysi

Khadka HSE My Options wuxu bixiyaa macluumaad ku saabsan sida loo helo adeegyada ilmo iska soo ridka.

Dhammaan dhakhtaradu ma bixiyaan adeegan. Khadka caawimada ayaa ku siin doona macluumaadka dhakhaatiirta iyo rugaha caafimaadka ee bixiya adeegan.

Taageero dhegaysi iyo garaabis ayaa sidoo kale la siin karaa qof kasta oo la kulma uur aanu rabin.

**Taleefanka bilaashka ah 1800 828 010**

Isniin – Salaasa: 9 subaxnimo illaa 8galabnimo
Jimce 9 subaxnimo illaa 7galabnimo
Sabtida: 10subaxnimo illaa 2galabnimo

Talo caafimaad ka dib adeegan ayaa laga heli karaa khadka caawinta 24ka saacadood ee maalintii, 7da maalmood ee usbuucii.

Webchat ayaa sidoo kale ku diyaar ah
**myoptions.ie**

Macluumaadka **adeegyada** ilmo-isksooridka oo ay ku jiraan taageero **caafimaad oo ah inta lagu jiro ilmo soo ridka** iyo ka dibba.

Haddii aad go'aansatay in aad iska soo riddo uurka, waxaad wici kartaa khadka caawinta ee My Options ee HSE si aad u hesho faahfaahinta xiriirka dhakhaatiirta guud (GPs), dhakhaatiirta kale, ama rugaha qorsheynta qoyska ee bixiya adeegga soo ridista uurka. Dhakhaatiirta guud (GPs) oo dhan ma bixiyaan adeegga soo ridista uurka.

Haddii aad iska soo ridday uurka, talo caafimaad ayaa ka heli kartaa kalkaaliyeyaasha caafimaadka adoo wacaya khadka caawinta, waxaana la heli karaa 24 saacadood ee maalintii, 7 maalmood toddobaadkii.

## **Taageero dhegaysi** iyo **talobixin**

My Options waxay bixiyaan taageero dhegeysi telefoon iyo webchat labadaba. Waxaad la hadli kartaa la-taliyeyaal xirfadlayaal ah oo khibrad leh, oo lacag la'aan ah. Iskuma dayi doono inaanu saameyno go'aankaaga keliya waxaan ku siin doonaa waqti aad ku hadasho, taageero iyo macluumaad.

Talada waxa lagu bixiyaa si bilaash ah. Adeegan waxa lagu bixiyaa taleefanka. Waxaad la hadli kartaa la taliye kaala taliya uurka ama ka dib markaad hawsha ku kacdo. La talinta waxa sidoo kale la siiyaa lamaanahaaga iyo xubnaha qoyska.

Haddii aanay Ingiriisidu ahayn luuqadaada koobaad, wac khadka caawinta ama waco qof aad aaminsan tahay. Waxaanu kuu heli karnaa turjumaano 240 luuqadood wax ku turjuma. Noo sheeg luuqadda aad ku hadasho iyo lambarka taleefankaaga. Waanu ku soo wici doonaa annagoo wadna turjumaan.

Macluumaad ku saabsan My Options oo ku baxaya 17 luuqaadood ayaa laga helayaa: **hse.ie/myhealthmylanguage**

## Taleefanka bilaashka ah 1800 828 010

Webchat ayaa sidoo kale la heli karaa si aad uga hesho macluumaad iyo taageero dhegeysi ah bogga **myoptions.ie**.